Hal-bixinta Ereyada Kumbuyuutarka

W/Q Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

Hal_aqoon@yahoo.com

Hordhac:



Intii far Soomaalida la qoray aqoonyahanno badan baa dadaal weyn u galay ururinta iyo dabaqabataynta murtida iyo maansada Soomaaliyeed, waxaanay soo hooyeen guulo waa weyn oo doqoni magaratay ah. Hayeeshee, dadaal kaa mid la mid ah ayaa loo baahnaa in loo galo hal-tebinta iyo hal-bixinta laamaha Sayniska guud ahaan.

Runtii, ma odhan, mana lihi, waxba lama qaban. Hase ahaatee, waxaan leeyahay dadaalkii loo galay ururinta iyo kii loo galay hal-bixinta iyo hal-tebintu isku xawli iyo xawaare toona kuma socon, mana sheegi karo in ilaa hadda laga maagayo iyo in looba arko inaan afkeenna waxba lagu soo hal-tebin karin.

Hadal iyo dhammaantii, buuggan waxan ku soo bandhigay hawl cusub oon filayo inay dad badan xaradhaamiso kuna baraarujiso ama ku dhiirrigeliso inay hawshan halkaa ka sii wadaan ama ay tan tu ka wanaagsan soo bandhigaan.

Buuggani wuxuu ka dhashay muran inta badan ka dhex aloosma waxgaradka Soomaaliyeed kaasi oo loogu kala jabo laba qaybood. Qayb tidhaa afkeennu waa hodan iyo in tidhaa waa magaan oo waa laga roone. Akhriste adigu, haddaba, dhankeed raacsan-tahay?

Aragtida aqoonyahanka :

Sidaa aan soo tibaaxay aqoonyahanno badan oo soomaaliyeed baa qaba *in af Soomaaligu sabool yahay oo uu ka arradan yahay dhanka aqoonta Sayniska oo aanu la socon karin heerka maanta laga marayo cilmiga, adagtahayna in aqoontaa iyada ah af Soomaali lagu soo hal-tebiyo*. Qoladaasi waxay door bidaan in la soo celiyo habkii waxbarashada afafka shisheeyaha ee hore.

Hal nin la toosani, illayn, nin la tuur lehe, dar kale oo aqoonyahanka ka mid ah ayaa iyaguna aragtidaa tu ka soo horjeedda qaba. Waxay iyagu rumaysan yihiin inaanu af Soomaaligu dhanna sabool ka ahayn ee uu dhinacii loo dhigaba hodan ka yahay oo haddii dhab loogu kuurgalo aqoon kasta oo jirta sideeda loogu soo hal-tebin karo si hawl yar. Waxa kale oo ay qolooyin kani qabaan in aqoonyahannada Soomaaliyeed yihiin ayaku kuwa ka qaawan ee muddugga ka ah afkooda, dhaqan kooda iyo hiddahoodaba, aqoon la'aan toodana in afka loo labadibleeyaa waa mid aan maangal iyo wax u dhow toona ahayn.

"Gari laba nin kama wada qosliso" ayey Soomaalidu tidhaahdaaye, anna kuwa dambe ayaan la aragti ahay. Hadal, hadal ka horgeena ma habboona oo waa i jiid aan ku jiido. Taasina horaa loo yidhi waa jeenyo daalis. Hayeeshee waxa habboon in wax lays tusaaleeyo oo ay labada dhinacba macangagnimada iska daayaan oo ay wax maangal ah dadka u soo jeediyaan.

Haddaba aniga oo rumaysan aragtida ah in aqoonyahanku uu si fudud oo hawl yar ugu soo hal-tebin karo aqoontiisa afka hooyo, haddii uu yahay qof ka haqabla' aqoonta afkiisa iyo hiddihiisaba, ayaan rabaa bal in aan tusaale u qaadanno hal-tebinta iyo hal-bixinta ereyada **Kumbuyuutarka** oo ah qalabka adduunka oo dhan si xoog leh looga adeegsado. Arrintu siday doontaba ha ahaatee, waa maxay hal-tebintu? Sideese wax loo haltebiyaa?

I. Hal-tebin:

Hal-tebintu waa isla doonashada hadallada iyo hawraaraha isleh ama isu dhigma ee ku jira laba af oo kala duwan. Haddaba waxa lagama maarmaan ah in aqoonyahanka Soomaaliyeed inta aanu hawshiisa ku dhaqaaqin uu kala ogaado bal in dhaqankeennii hore iyo afkeennaba laga heli karo ereyo ama aragtiyo u dhigma kuwa ku jira aqoonta uu soo hal-tebinayo iyo inkale. Haddii kolkaa laga helo dhaqan keenna wax u dhigma aqoontaa looma baahna in ereyo cusub la bixiyo iyo in qaar kale la soo ergisto toona. Waxa keliya ee qummani waa sidii afkeenna loo galtibixin lahaa, erey walbana ereygiisa loogu tebin lahaa ama loola doonan lahaa. Kolkase laga waayo halkii uu Dhoodaan ka yidhi, "Orgi fuullayaa iyo qabaal Miig ka dhigannaaba waa inaan gu'gan dayaxa aadnaaye." Waxa aan anna leeyahay, "Erey keennayaa iyo ku kale soo if bixinnaaba waa inaan gu'gakan ereyo keennaaye ! " Ujeeddaduna waa in la sameeyo hal-bixin ama erey-bixin qofba sida uu u yaqaan. Aniga oo haddaba labadaa arrimoodba haabka ku haya ayaan rabaa bal inaan kolka hore ku bilaabo **:**

Haddii aan wax yar miyigii ku laabanno, sida la wada ogsoonyahay, dadka Soomaaliyeed waxay lahaayeen weel ay adeegsan jireen. Weel kaasi ama **Qori** buu ahaan jirey ama **Qabo. Qorigu** waa wixii weel ah ee geed laga qoro ama ka qoran sida: **Xeedhooyinka; dhiilaha; fandhaallada; dhurayaa-sha iwm, qabaduna** waa wax alla wixii weel ah ee la tolo.

Haddaba, qabada intaan la adeegsanin ama aan wax lagu qabsanin ee ay cusub tahay waxa la yidhaahdaa " **Gocayo.**" Weel gocayo ah waxba laguma shubto, waayo wuu wada daloolaa oo wixii lagu shubaba wuu habaa. Kolka haddaba la doono in la adeegsado weel gocayo ah, marka hore waa la agloolaa ama waa la xooleeyaa ama waa la layeeyaa, ujeeddada oo ah in loo diyaariyo sidii weelkaa loo adeegsan lahaa.

AGLOOLIDDA (xoolaynta ama layeynta) :

Qorrog iyo cajalad gocayo ah

Haddii haan ama gorof (hadhuub-gaal) mid ahaan la rabo in la **agloolo (** la **xooleeyo, ama la layeeyaba)** marka hore **asal iyo hogeeyaa.** Intaasi kolka ay dhammaatana caano dhay ah ayaa lagu dhaqdhaqaa. Ugu dambayntana waa la culaa (cugaa) oo la cidaadaa.

Xagga suumanka, seetooyinka iyo yeelaha laga jeexo saantana inta xaydh ama heen mid ahaan, lagu dufniyo ayaa la liilshaa.

Halkaa waxa haddaba innooga dhuroobey oo innooga cad ***inaan weel gocayo ah marna la adeegsanin tiiyoo la agloolo mooyaane, suun iyo seetana aan la xidhan karin; waxna lagu xidhikarin tiiyoo la liiliyo moo yaane.***

Habkaasi oo ay dadka Soomaaliyeed yaqaanneen intaan Kumbuyuutarku soobixin ama soosaariddiisuba ku soo dhicin haabka iyo maskaxda aqoonyahankii soo saaray, miyaanu la mid ahayn habka hadda loo adeegsado **Diskiga Kumbuyuutarka?** Diskigu kolka uu cusub yahay waxba luguma duubi karo haddii aan waxa loo yaqaan " **Formatting** " lagu samayn. Intaa haddii aan hal-tebiyo miyaan la odhan karin **Diskigu marka hore waa gocayo sidii haamaha, kolka dambana miyaan la odhan karin waa la agloolayaa ama waa la xoolaynayaa inkasta oo aan isaga xaydh iyo asaltoona lagu dhaqdhaqin?** Ujeeddaduse, wax kasta ha lagu sameeyee, miyaanay isku mid ahayn oon loo diyaarineynin sidii wax loogu duubi lahaa oo loo adeegsan lahaa?

Ugu dambayntii, miyaynaan si hawl yar af Soomaali ugu hal-tebin karin ereyada af Ingiriiska ah ee qaybtaa kumbuyuutarka lagu adeegsado oo aynaan odhan karin sidan?

Format - **Aglool**.
Formatted - **Agloolan**.
Formatting - **Agloolid**.
Reformat - **Dib u aglool**
Unformatted - **Gocayo ah**.

Qorrog iyo cajalad agloolan oo midna caano ku jiraan midna wacaali ka buuxdo

Weli hawshii haweenkaan ku jirraaye, kolka ay haweenku karinayaan, tusaale ahaan, bariis ama hadhuudh, intaanay dheriga ku shubin waxay hubiyaan oo ka saaraan wixii saxarro, qururux yaryar iyo wax alla wixii loo arko iney gawsaha dhibaato u keenikaraan. Hawshaasi waxa la yidhaa '**bidhiiqin**'. Ereyga falkiisu waa '**bidhiiqi**'. Sidaasi oo kale ayaa kolka qorme kumbuyuutar la qorayo loo hufaa oo wixii gef ah ee gala looga saaraa. Hawshaasi waxa la yidhaa ' **Debugging**'. Falka eraygu waa ' **Debug**'. Miyeynaan haddaba si hawl yar labadaa hawlood isugu hal-tebinkarin oo aynaan odhankarin sidan hoos ku qoran?

Debug - **Bidhiiqi**
Debugging - **Bidhiiqin**

Dhanka beeraha haddii aan yar jeedaalinno, kolka beer la qodayo, marka hore waxa la jeexaa laba faag, kuwaas oo muujinaya halka ay beerta faliddeedu ka bilaabmayso iyo halka ay ku dhammaanayso. Waxana la kala yidhaa **Faagga bidix** iyo **Faagga midig.** Labadaa faag inta u dhaxaysana waxa la yidhaa " **Booy** ", waana inta shinnida ama abuurkaba lagu shubo ee maalintaa la doonayo in la qodo.

Meerar

Faagga bidix



Hornog

Habkaa mid la mid ah ayaa isna kumbuyuutarka lagu adeegsadaa kolka meeris la qorayo, waxana loo sameeyaa wax la yidhaa "**Margins**". Haddaba "**Faag** " miyaanu u dhigmin ereyga " **Margin** ", faagga bidix iyo faagga midigna u kala dhigmin "**Left margin** " iyo "**Right margin".**

Dhanka magacyada xoolaha haddii aan yar milicsanno; **Qaydo** waa ri' magaceed waxana loo bixiyaa ri'da dhexda ku leh Midab ka geddisan midabkeeda. Haddaba, isirka magacu waa qayd.



Qaydo

Dulucduna waa tii qaydka lahayd. Kolka uu ereygu falka yahay ujeeddadiisu waa astee. Jago ama beer ayaana la qaytaa. Kumbuyuutarka, haddaba, kolka erey, hawraar, cutub ama qayb ka tirsan meeris la rabo in la biiyo ama la dheego, marka hore waa la asteeyaa. Waxana la yidhaah '**Block on**' ama '**High light**'.



Meeris qaydan

Furaha hawshaa qabtana waxa la yidhaah '**Block on key**'. Hadal iyo dhammaantii miyeynaan ereyadanna sida tani isugu tebin karin :

Block on (high light) - **Qayd**
Block on key - **Qaydeen**

Memory stick/ Aleen:

Beryahan waxa soo baxay qalab cusub oo wacaasha lagu kaydiyo oo lagaga gudbayo kuwii hore ee gadowyada. Qalabkan cusubi waa wax dhuuban oo sida faraha ah oo jeebka lagu qaadan karo. Waxa la yidhaa '***Memory stick***'. Qalabkaasi wuxu ixusuusiyey carrabbadii koorta ku dhexjiray kuwaasi oo dadka qaarna u yaqaanniin '**Aleenno**'. Midkuna waa '**aleen**'. Miyaan labadanna sidan laysugu hal-tebin karin oon la odhankarin:

Memory stick = Aleen

II. H A L - B I X I N T A :

Hal-bixintu waa bixinta erey cusub oon hore loo aqoonnin adeegsigiisa ama siinta erey hore u jirey ujeeddo labaad oon hore loogu aqoonnin ama ergisashada ereyo shisheeye ah kolka la waayo ama la bixin kariwaayo ereyo halkooda gala ama ujeeddooyinkooda daboola sida ereyada **Kumbuyuutar**, **Juquraafi, Saynis, iwm.**

Aan dooddayda halkii ka sii watee, kumbuyuutarku wuxuu ka kooban yahay saddex (3) qaybood, sida ku qeexan **....**

Hadal gun buu leeyahee wuxuu buuggani awood innoo siinayaa inaynu markii u horreysey af Soomaali ku baran karro kagana hadli karro Kumbuyuutarka iyo wixii la xidhiidha, kaasoo ay markii hore adkayd in af Soomaali lagaga hadli karo. Waxa kale oo uu awood innoo siinayaa inaynu markii u horreysey yeelanno furahayeen af Soomaali ku qoran (The first Somali key board), iyo weliba inaan si hawl yar u soo hal-tebsan karro qormayaasha kala duwan ee kumbuyuutarka hadda lagu adeegsado.

Hadal iyo dhammaantii haddii aad go'aansato inaad dheeg iibsato la xidhiidh

www.lulu.com/content/1740048